



Barnaamijka Indha-ku haynta Dugsiga ee Adeegyada Booliiska San Diego City School

Waxbarashadda degmada oo dhan muhimada ugu weyn waa nabadgelyada iyo badbaadada San Diego City Schools. Adeegyada Booliiska ee loo qoondeeyey barnaamijka ka hortega dembiyada ee saldhigiisu yahay jaaliyada waxaa loogu talagalay in lagu yareeyo tuugada guryaha soo jabisa, feegaarka derbiyada, kharibaada dhismeyaasha, tuugada, iyo meel dab qabadsiiinta ama gubista, waxaa loo yeqaanaa Barnaamijka Indha-ku haynta Dugsiga. Indha-ku haynta dugsigu waxay ku dhiirigelinaysaa jaaliyadaha dugsiga, dadka waaweyn, carruurta, iyo jaalalka ganacsigu inay indhaha-ku hayaan wax kasta oo caadiga ka baxsan ama laga shakiyi karo wakhtiyada caadiga ah ee goobaha dugsiyadu ay furan yihiin, saacada kedib iyo wakhtiyada ay xidhan yihiin.

Sannad kasta waxay waxbarashadda degmadu bixisaa in ka badan malyan doolar oo ay Barnaamijka Indha-ku haynta Dugsiga ay ka caawin lahayd inay yareeyso. Dadaalka wadajirka ah ee ay jaaliyadaha dugsiyadu sameeyaan waxay dugsiyada ka caawin karaan inay noqdaan meel nabadgelyo leh ayna dembiyada ka hortegaan.

Laga bilaabo bisha Sebtember 2004, Adeegyada Booliisku waxay Dugsiga Sare ee Serra ka bilaabi doonaan Barnaamijka Indha-ku haynta Dugsiga. Waxaa loo qoondeeyey inay derisku noqdaan indhaha iyo dhegaha ilaaliya dugsiyada. Barnaamij tijaabo ah ayaa wejigiisa bilowga ah hirgeliintiisa lagu bilaabey Jaaliyada Dugsiga Sare ee Serra.

Xilliga dayrtan, SDCS Saraakiisha Booliisku waxay guri kasta irridiis tegayaan dadka deriska ah iyagoo weydiinaya inay iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeyaan, isla mar ahaantaasna, barnaamijkan cusub u sharaxaya. Dadka deegaanka waxaa laga codsaneyaa inay wax ka beddelaan wakhtiyadii ay waraabin jireen cawska guriga dayrkiisa ku yaal, baabuurtooda ay maydhi jireen, adeeg yar soo qabsan jireen, iwm sidaan darteed waxay indhaha-ku hayn karaan dembi kasta oo ka dhacaya saacadaha dugsiga lagu jiro ama dugsiga laga baxo kedib.

Waxyaabaha dabeecadaha shakiga abuura waxaa ka mid ah meel si macno-darro ah ugu warwareegid, buuqa ama qaylada aan caadiga ahayn sida jabinta muraayadaha dariishadaha, dagaalka iyo qaylada, dadka agagaarka dugsiga ka cararaya, ku feegaarida derbiyada, iska soo lalminta shabaga kubbadda koleyga, jeexjeexida calaamadaha dugsiga, waxyeelaynta dhirta quruxda badan ee la beeray, iwm.

Dadka deriska ah looga MA baahna inay magacooda sheegaan marka ay soo sheegayaan dabeecada KASTA oo laga shakiyo oo ay arkaan.

Marka aad soo sheegaysid wax kasta oo aad ka shakido, waxaad wacdaa Booliiska Dugsiga oo nambarkiisu yahay **(619) 291- 7678**
Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay Annie E. Casey Foundation

Somali version: SDCS Police School Watch Program

Warbixinada kala xidhiidh: Adeegyada Booliiska SDCS: (619) 725-7000 Maamulka (619) 291-7678 Diritaanka
Su'aalaha Warbaahinta: (619) 725-5578

www.sandi.net

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 136,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 202 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma (oo meteleya 15,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta ee fasalada Xanaanada ilaa iyo 12aad. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

OO KOOBAN

- ❖ Inaad oggolaatey inaad caawisid dugsiyada deriskaaga ah
- ❖ Inaad noqotid indhaha iyo dhegaha dugsigaaga
- ❖ Sannad kasta degmadu waxay bixisaa in ka badan \$1 malyan oo ah waxyeelada dugsiyadeena loo geysto
- ❖ Noocyada dabeecadaha la rabo in la ilaaliyo waxaa ka mid ah:
 - ❖ Meel macno-darro ah ugu warwareegid
 - ❖ Buuqa aan caadiga ahayn sida jabinta muraayadaha dariishadaha, dagaalka iyo qaylada
 - ❖ Qof kasta oo agagaarka dugsiga ka cararaya
 - ❖ Ku feegaarida derbiyada
 - ❖ Iska soo lalminta shabaga kubbadda koleyga
 - ❖ Jeexjeexida calaamadaha dugsiga
 - ❖ Waxyeelaynta dhirta quruxda badan ee la beeray
- ❖ Dhammaan dadka soo wacay magacooda lama sheegayo, waana qarsoodi
- ❖ Waxaad wacdaa **(619) 291-7678** si aad u soo sheegid dabeecada KASTA oo aad ka shakisan tahay